Mogadişu Somali - Türkiye Recep Tayyip Erdoğan Eğitim ve Araştırma Hastanesi

Ali Harun Airow

XUQUUQDA SHAQAALAHA İYO WAAJİBADAKA SAARAN

HABKA SAACADAHA SHAQADA (Maalin, Asbuuc iyo Bil)
&
SİDA LOO XISAABIYO

HABKA SHAQADA İSBİTAALKA:

- İsbitaalku Wuxuu Shaqeeyaa 24/7 saac.

SAACADAHA İYO MAALMAHA SHAQADA:

- Saacadaha shaqada ee maalintii waa 8 saac maalinta khamiista waa 5 saac, maalinka jimcaha fasax. Waxaa asbuucıı la shaqeeyaa 6 maalin saacad ahaan 45 saacadood
- shanta maalın shaqada waxay bılaabataa 07:30 waxayna dhamaataa 16:30 maalınka khamıista waa 07:30 - 12:30.
- Maalinkasta Saacada nasashada waa 12:00 – 13:00 .

HABKA LOO XİSAABİYO SAACADAHA BİSHA:

- Saacadaha shaqada ee billaha ah waxaa loo xisaabiyaa ayadoo inta maalmood bisha ay ka koobantahay lagana jaraayo jimcayaasha iyo maalmaha fasaxyada ciidaha ama maalmaha wadanka, maalmaha caadıga ah waxaa lagu qiimeeyaa 8 saac halka khamiistana lagu qiimeyo 5 saac.
- Marka la xisaabinaayo saacadaha dheeraadka ah ee 7'da maalin ee asbuuca wuxuu shaqaaluhu xaq uyeelanaa qadar lacag ah oo udhiganto 1 saac oo maalinta shaqada caadıga ah.
- İsku darka saacadhaan haday ka bataan saacadaha shaqada ee bisha, shaqaalaha wuxuu xaq uyeelanaa lacag dheeraad ah.
- FG: inta aad tijaabada ku jirtid waxa mushaar ahaan lagu siinaa %75, wax kale oo xaq u leeyahay ma jirto.

FASAXYADA

Fasaxyada waxay kala yihiin sida soo socota:

- a)Fasax Sanad.
- b) Fasax Shucaac.
- c) Fasax Guur.
- d) Fasax Dhalmo
- e) Fasax Dhimasho.
- f) Fasax Xanuun.
- g) Fasax aqoon kororsı (wadanka dibaddiisa).
- h) Fasax Saacadeed.
- i) Fasax Lacag la'aan.

a) FASAX SANAD:

Shaqaaluhu wuxuu xaq uyeelanaa fasax sanadeed dhan; (sanadaha 1-3 inta u dhaxeyso 14 maalin) (sanadaha 3-10 inta u dhaxeyso 20 maalin) (10 sano kadib 30 maalin) markuu sanad ubuuxsamo wuxuuna isticmaali karaa ilaa sanadka kale laga gaaraayo.

*Fasax Sanadeed uma gudbo sanadka kale.

b) FASAX SHCAAC:

Fasaxaan kaliya waxaa isticmaali kara shaqaalaha ka shaqeeyaqeybta raajatada waana 12 maalmood.

*Fasax Shucaac uma gudbo

sanadka kale

c) FASAX GUUR:

Shaqaaluhu wuxuu xaq uleeyahay 7 maalin fasaxa guur ah.

*Fasaxaan waxaa laguu ogolyahay halmar.

d) FASAX DHİMASHO:

fasaxa dhimashadu waa 5 maalin. Waxaana laguu ogolyahay (hooyo, aabe, walaalkula dhashay, xaaskaada iyo caruurtaada)

Marka ay geeri ku timaado.

e) FASAX DHALMO:

Shaqaalaha dumarka ah waxay xaq uleeyahay 2 bilood oo fasaxa dhalmo ah.

f) FASAX XANUUN:

Fasaxyada Xanuunka Waa Laba Nuuc;

1) **Raboor hal dhakhtar ku saxiixan:** Hadii uu shaqaaluhu xanuunkiisa dhakhtar cadeeyo, wuxuu xaq u leeyahay 10 maalmood sanadkii.
2) **Raboor hal dhakhtar ka badan ku saxiixan yihiin:** Hadii uu shaqaaluhu xanuunkiisa ugu yaraan 3 dhakhtar ay cadeeyaan, wuxuu xaq u leeyahay ilaa 3 bilood sanadkii.

FG: raboorka waxaa la ogolyahay markay dhakhaatiirteena ay soo qoraan

g) FASAX AQOON KOROSI:

Hadii uu shaqaaluhu aadayo tababar ama siminaar la xiriira shaqadiisa wuxuu xaq uleeyahay 10 maalmood sanadkii.

h) FASAX SAACADEED:

Shaqaalaha wuxuu qaadan karaa fasax saacadeed. Hadii saacadahaas ay gaaraan 8 saacadood waxaa loo xisaabinaayaa 1 maalin wxaana laga jari doonaa fasax sanadeedka.

i) FASAX LACAG LA'AAN:

Shaqaalaha wuxuu qaadan karaa sanadkii bil (30 maalmood) oo fasax lacag la'aan ah hadii ay jirto sabab macquul ah uuna aqbalo maamulka isbitaalka.

* Fasax sanadeed isagoo u yaala ma qaadan karo fasaxaan.

RUQSO SHAQO

Shaqaaluhu markuu shaqada ka tagaayo waa in uu soo wargeliyaa maamulka isbitaalka 1 bil ka hor si uu uhelo xaquuqdiisa. Hadduu waxbarasho u aadaayo dalkaTurkiga shardigaani ma saameynaayo.

Shaqaalihii iskiisa uga taga shaqada muddo 1 sano gudaheed ah lama shaqaaleysiin doono.

HABKA QAABKA XAQSİİNTA:

Shaqalaha waxaa loo xisaabiyaa qaab maalinle ah, tusaale ahaan hadii shaqaalaha sanad shaqeeyo xaqiisa wuxuu noqonaa hal bil mushaarkiisa ah.

Haddii uu shaqaaluhu geeriyoodo wuxuu xaq uleeyahay mushaarkiisa iyo xaqiisa intuu isbitaalka ka shaqeeynaayay.

HABKA CİQAABTA İYO GANAAXA

- Shaqaalaha howsha loo igmaday uu kasoo bixi waayo wuxuu muteysanaa ciqaab ama ganaax.
- Haddii 3 jeer laga soo gudbiyo dacwad waxaa laga joojinaa heshiiska shaqada.
- Haddii shaqaalaha anshax xumo looga saaro shaqada dib dambe looma qaadan doono shaqaale ahaan.
- İsbitaalka wuxuu leeyahay guddi anshax ah ayagaana gaara go'aanka ciqaabta iyo ganaaxa.

SHAQAALAHA BİSHA

HABKA LOO XULO SHAQAALAHA BİSHA

Iyada oo shaqaalaha lagu xulaayo qaabkan:

In yahay waqtigada shaqada mid dhowro, labiska shaqada u hagaagsan yahay iyo inuu u hogaansamo awaamirta madaxda. waxaa lagu abaal marinayaa shahaado sharaf iyo (10 %) toban boqolkiiba mushaarkiisa. Bilkasta waxaa la abaal mariyaa ilaa 3 shaqaale ee bishaas ugu fiicanaa, waxaana lagu soo xula qaab guddi ah.

*Shaqaaluhu sanadkii laba ka badan lama dooran karo.

SHAQAALAHA KA SHAQEEYA QEYBA GAAR

Shaqaalaha ka shaqeeya qeybaha gaarka ah sida: Qeybta Gurmadka Degdegga, Qeybta Saalada Qaliinka, Qeybta Dhalmada, Qeybaha Xaaladda Adag, Qeybta lagu jeermis dilo qalabka caafimaad iyo Qeybta killiya Sifeynta wuxuu xaq u yeelaan doonaa (10 %) toban boqolkiiba mushaarkooda ka dheer.

FG: kaliya waxaa qaadanaayo lacagta 10% shaqaalaha caafimaadka (kalkaaliyayaasha)

Madax qeybeedyada waxay xaq uleeyihiin (10 %) toban boqolkiiba oo mushaarkooda ka dheer.

THANK YOU FOR
LISTENING
makeameme.org